

Golaha Wakiilada JSL

Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

Kal-fadhigii 43^{aad} Fadhiyadii 13^{aad} iyo 14^{aad}

Sabti & Axad 22, 23 August 2020

Quraanka: - Md. Maxamuud Axmed Obsiye

Gudoonka: - Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Wax-ka-beddelka Xeerka Kufsiga, Si. iyo X. la-xyidhiidha

Gudoonka:- Mudnayaal maanta waxaynu u balansanayn Doodda Xeerka Kufsiga, xildhibaanada ka doodaya qaar fadhigii hore ayay isasa sii qoreen, xildhibaanada aan is qorin ee ka doodayana Xoghayntu ha qorto, waxaynu bilaabanaynaa doodda waxaana ku soo dhoweynayaan, Md. Xuseen Ismaaciil Yuusufu.

Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf (4min,13sec):- Asc, Gudoomiye Shirku waa salaaman yahay, Xeerkan waan dulmaray siduu u dhan yahay, Xildhibaan walibana ra'yigiisa ayuu ka dhiibanayaa, Xeerkan wuxuu ka kooban yahay 43 Qodob waana Xeerkaa Golaha ka baxay markii hore oo isbadal iyo kaabis balaadhan lagu soo sameeyay, habka loo soo dhisay, luuqada lagu soo qoray iyo sida loolla xyidhiyidhiyay Xeerka Ciqaabta Guud waxaad mooda inuu ka soo baxay Gole culimada iyo garyaqaanadu ku badan yihiin, waxaanu si mug leh oo waafiya salka ugu hayaa Dastuurka Qaranka, Xeerka Ciqaabta Guud iyo shareecada Islaamka oo labaduba salka ku hayaan, kufsiga, fataalnimada, khaniisnimada iyo dhamaan xad-gudubyada la xyidhiidha oo aanu ciqaab ka soo saarin waxaan isleeyahay ma jirtoba.

Waa Xeer aad iyo aad maanta wadanka looga baahan yahay xataa sixiroole gabadh sixraya ama mid xayawaan fuulay lagama tagin, xaqiinta iyo xanaanaynta dhibanaha oo had iyo jeer dhadig ah iyo ciqaabta dambiilayaasha kala duwan oo dhamaantood salka ku haya shareecada Islaamka, markaa Xeerkaani waa Xeer si cilmiyaysan oo tafaftiran loo soo agaasimay oo si wanaagsan loo soo qoray, waa suurtagal in Xildhibaanadu soo jeediyaan waxyar oo iska horimanaya ama khaladaad yaryar.

Waxaan anigu soo jeedinaya Gudoomiye, Xeerkaani siduu yahay marka Xildhibaanadu aragtidooda soo jeediyaan si deg-deg ah loogu codeeyo oo loo sii daayo waayo waa Xeer loo baahan yahay oo aan isleeyahay Ciqaabtiisu way dhan tahay Shareecada Islaamkana way ku fadhidaa. WSC.

Md. Cabdiraxman Yuusuf Cartan (24min):- Gudoomiye, Xildhibaanada iyo Saxaafada dhamaantiin ASC, Gudoomiye koleyba sidii aad adiguba sheegtay maalintii dhoweyd Xeerkani waa xeer cubus, halkan waxa ku qoran Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Kufsigu, Sinada iyo xadgudubyada la xyidhiidha, marka waa Xeer cusub, waana in loola macaamilaa xeer cusub, halkana waxa ku qoran cidii soo sameysay waana wax ka badalka iyo kaabist ka hadlaya.

Xeerku guud ahaan waa xeer wanaagsan oo aad u fiican sidii Xildhibaan Xuseen Ismaaciil u tilmaamay tacab badan baa la galiyay, xagii shareecada Islaamkana wixii arrin ee shareecadu ka qabtana si fiican baa loola doontay, laakiin Qodobada ku saabsan ciqaabta ee Xeerkan laba arrimood baa is daba socda oo ah qofka gala faldambiyeed kufsi waxa lagu qaadayaa xadka sinada iyo tacsiiir wax la yidhaahdo oo xadhiguna qoran yahay 5 sano ilaa 10 sano, 10 sano ilaa 20 sano.

Marka laba ciqaabood baa wada socda ciqaabta xadka oo macneheedu yahay qofkii gala sino in la arjumo iyo in la karbaasho, marka su'aasha aan isweydinayaa waxa weeye tacsiiirta oo macneheedu yahay qofkii sino gala hadii la arjumo ama la jeedalo miyay sida xeerku qorayo tacsiiirtuna la socotaa? Iyadoo la jeedalay ama la arjumay miya hadana la xidhaya, mise hadii fulinta xadku adag tahay madaama shuruudo adag ku xidhan yihiin fulintiisa, ma qofkii xadku ku fuli waayo hase yeeshe lagu hayo fal-dambiyeed kale oo aan ku waajibayn in lagu fuliyo xadka baa la xidhayaa oo tacsiiirta lagu fulinayaa miyaa?. Haday sidaa tahay kuma cada xeerka ee waa in lagu cadeeyaa Xeerka oo la yidhaahdo qofkii xadka sinada gaadhi waaya waa in tacsiiir lagu fuliyaa, marka halka cadeyn baa loo baahan yahay oo la kala saaro tacsiiirta iyo xadka sinada.

Mark **Qodobka 4^{aad}** Farqadiisa 1^{aad} waxay sheegaysaa in qofkii sino lagu ciqaabayoo xadka sinada ee shareecada Islaamka markay ku cadaato, Farqada 2^{aad} waxa ku qoran qofkii qof aanu gayin oo muxramkiisa ahayn ka sinaysta waxa lagu ciqaabayaa xadka shareecada iyo xadhig u dhexeeya **(10 ilaa 15 sanadood)**, tacsiiirtu waa hadii aanu ciqaabkiisu dil ahayn, halka waxaad ka dhadhaminaysaa in xaakinku uu odhan karo ha la dilo, marka culimadii wax wanaagsan bay sameeyeene waxa fiican oo halka loo baahan yahay fasiraad in la kala cadeeyo tacsiiirta iyo xadka sinada oo soo noqnoqoneysa.

Farqada 5^{aad} ee isla Qodobka 4^{aad} waxa ku qoran *“Qofkasta oo si ula kac ah oo cadawtinimo leh u sinaysta si uu bulshada ugu dhax faafiyo cudurka (HIV/aids) ee uu xambaarsan yahay wuxu mutaysanayaa ciqaabta shuftinimada ee kuxusan aayada (33^{aad}) ee suurtul maa'iada”*. Aayada suuradaasi waxay leedahay kuwa la

dagaalama ilaahay iyo rasuulkiisa SCW, dhulkana ku faafinaya fasahaad in la dilo ama la salibo ama gacmaha iyo lugaha si talantaali ah loo gooyo, xeerar dabcan markaynu Somaliland waxa fiican xeerar inoo shaqeynaya oo aynu fulin karayno, waad ogtihiino mujtamac qabali ah baynu nahay iminka saddex xeer baa inoo shaqeeya, Indian panol code-kii, Shareecada Islaamka oo Maxkamadaha la isku xukumo mararka qaarkood iyo dhaqankii, qofkuna hadba kuu dan u arko buu tagaa, marka Xeerkan qofka geysta isagoo xanuun qaba oo cid u taga ama kufsada dambi wayn buu galay, laakiin aayadaas suuratal maa'ida kuma xukumi karaynaan u malaynayaaye inkasto Diinteenii sheegayso oo shuftonimo la yyidhi, halka waxaan doonayaa inaan attention-kiina ku soo jeediyo oo waxaa fiican inuu Xeerku noqdo mid shaqeynaya oo bulshadii wax loogu qabanayo.

Farqada 6^{aad} ee isla Qodobkaas *“Hadii ilma yar ama qof waalan uu qof kale ka sineysto wax ciqaaba lamarin maayo balse waxaa waajib ku ah cida masuulka ka ah ilmaha yar ama qofka waalan iney mariyaan edbin iyo akhlaaq toosin shareecada waafaqsan”* inkastoo ayna ka hadlayn dad waalan oo wax kufsanaya hadana taas lafteedu waxay u baahan tahay fasiraad.

Qaybta T oo Kufsigu ka hadlaysa iyana waa sidii oo kale oo Xadkii Shareecada iyo Tacsiiirtii baa wada socda, marka aniga soo jeedintayda ugu weyni waxa weeye in tacsiiirta iyo xadka la kala furfuro miyaynu wada fulinayna mise marka xadka la gaadhi waayo baa tacsiiirta la fulinayaa.

Qodobka 11^{aad} Farqada 2aad waxa la yyidhi fara-farayn galmo la xyidhiidha waxay sharaxaysa farqada 1aad ee wax cusub ma soo kordhinayso.

Qodobka 12^{aad} Guur khasab ah ka hadlaysa, waxay leedahay qof yar oo aan qaangaadhin ama qof waalan waa loo guurin karaa, anigu waxaan soo jeedin lahaa masraxada caamka si loo helo qofka qaandgaadhka ah ee 15 jir gaadha ha loo guuriyo.

Qodobka 14^{aad} oo ka hadlaysa sixiroolaha waxa ku qoran qofka sixiroolaha ah ciqaab dil ah hadana waxa ku qoran in wixii uu gaystay laga doonayo tolkiisii wixii sixirka dhib ka dhalatay, marka labadaasi isma qabtaan, qofkii hadii la dilay sidee magdhow looga doonayaa.

Qodobka 16^{aad} oo ka hadlaya isqaawin ama muujin carawda ay shareecada islaamku waajibisay, taasi waxa weeye qofku marku maryaha tuuro oo aynu u naqaano isqaawin, laakiin hadii qofku timaha muujiyo oo aanay hijaab sidan oo la yidhaahdo way qaawan tahay dee wax la aqbali karo maaha, qodobkaas waa in laga saaro meesha, qodobkaasi sida uu u qoran yahay tafaasiil dheeraada ayuu u baahan yahay oo maxay noqonaysaa isqaawintu in la qeexo.

Qodobka 27^{aad} isaga waxaan saxayaa afsomaliga oo farqadaha 2aad iyo 3aad waxa ku qoran ciqaabyada ee waa ciqaabaha marka ha laga dhigo ciqaabaha.

Qodobka 34^{aad} farqada 2^{aad} Xarafka (J) waxa ku qoran in aan warbixinta dhakhtarka loo adeegsan karin inay cadayso faldambiyeed, marka in laga daayo wixii la taxay loo daayo inay cadaymaha muujinayso ee aan qaar la odhan looma adeegsan karo sida tan warbixinta dakhtarka, marka halkaaas waa in laga saaro inta dambe ee ah “laguma kalsoonaan karo” mar hadii wixii la taxay sidooda loo daayo.

Qodobka 28^{aad} Farqadiisa 2^{aad} waxa ku qoran waana arrintaan doonayo in qolyaha garyaqaanadu eegaan waxa ku qoran farqadaas “*Hadii ciqaabta faldambiyeedka la soo oogay ay tahay 10 sano iyo ka yar waxa dhagaysanaya Laanta Caadiga ah (general section) ee maxkamada gobolka, hadiise ciqaabta faldambiyeedka la soo oogay uu yahay 10 sano iyo ka badan waxa dhagaysanaya laanta tashiga (asszce section) ee maxkamada gobolka ay ku taalo goobta falku ka dhacay sida uu dhigayo qodobka 12aad ee xeerka nidaamka garsoorka iyo xeerka habka ciqaabtu*”. Marka labadaas laamood ee laanta caadiga ah iyo laanta tashiga ma saxbaa, Ingriiska (*asszce section*) waa khalade isbeelinka ha la saxo.

Qodobka 38^{aad} Farqada 2^{aad} halka ugu dambeysa waxa ku qoran “ama ciqaabista la tuhunsanaha hadaanay la socon cadaymaha ku xusan qodobka 32 aad ee xeerkan” marka halka Qodobka 32aad ku qoran tahay maahe waa Qodobka 34aad oo waa khalad madbiciya, sidoo kale Farqada 2aad way ku qoran tahay Qodobka 32aad isna ha laga dhigo Qodobka 34aad. Intaas baan ku soo gabo-gabeynayaa, waadna ku mahadsan tihiin dhageysigiina.

Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud (2min, 59sec):- Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Saxaafada, Marti-sharafka iyo Shaqaalahaba waan salaamayaa ASC, bacda salaam, Xeerkani dhowr jeer buu ina soo maray doodo badana way ka dhasheen oo waa tii aynu celinay, hadana waxaan u malaynaa Wasaarada Diinta iyo Awqaafta keentay oo isku soo dubo riday shareecadana soo waafajisay, wax kasto laga doodo shareecada islaamka la raacayaa, in la toostoosiyo oo wixii ka khaldan la saxo waa muhiim.

Hadii aan ku soo dhowaado doodda, Xeerkan si fiican baan u eegay aad buuna uga duwan yahay kii hore, marka si fiican bay ugu soo fadhiisiyeen oo cilmi-baadhis fiican oo qiimeysan bay ku soo sameeyeen, marka anigu kolay meelo badan baan ka soo eegay, waxaan odhan lahaa oo aan soo jeedinayaa in sidiisaa lagu ansixiyo mar hadii si fiican oo shareecada waafaqsan loo soo dhigay.

Md. Faaraax Maxamuud Cabdule (4min, 21sec):- ASC, Mudane Gudoomiye halkan waxaynu ku ansixinay Xeerka Kufsigu Madaxweynaha ayuuna u gudbay, hadii Madaxweynuhu wax ka badal iyo Kaabis soo codsaday halkan kama muuqato sidii Golayaashu isugu gudbin jireen sharciga, magaca Xeerka waxa ku taala wax ka badal iyo kaabis Xeerka Kufsigu iyo waxyaabaha Sinada la xyidhiidha, waana Xeer cusub Xeerkani oo maaha kii aynu Madxweynaha u gudbinay, kumana iman hab-raacii sharciyada la isugu gudbin jirey, mana hayno Qodob uu Madxweynuhu leeyaya waxaan soo jeedinayaa in Qodobkas wax laga badalo ama loo badalo sidaas iyo sidaas oo sababaysan, taasina halkan kama muuqato oo waa Xeer cusub.

Waxa kale oo muuqata awal waxa la inaga cabanayay shareecada Islaamku ka soo horjeeda, ma tafaftirna baan qabaa xaga shareecada islaamka lafteeda oo anigu waan akhriyay, markaad akhridana xeerku qaaabkiisa guud, siduu golaha u soo galay iyo sidii uu aniga Xildhibaan ahaan iigu yimi baan wax ka badal aan odhan kara halka waxaas iyo waxaas ha lagu badalo, laakiin waxay iigu muuqatay Xeerkani in aanu saxsanayn aniga, wax ka badal Madxweynuhu soo jeediyayna meesha kama muuqdo, wax ka badal culimo ku soo sameysaana inama khuseyso inaga oo xeer waxa inoo soo gudbiya Madaxweynaha wuuna sababeeyaa, taasina kama muuqato, gudi baynu u leenahay uu soo maro iyana kama muuqato oo Gudiddii Arrimaha Bulshadu soo jeedintoodii iyo taladii ay ka bixiyeen meesha kama muuqato, Ad hoc Committee loo saarayna kama muuqato.

Marka anigu waxaan soo jeedinayaa in Xeerka la saxo waxyaabo in shareecada la waafajiyo u baahanina way ku jiraan, marka in hab-raaca la waafajiyo oo sidii Xeerarka isugu gudbin jiray ha lagu keeno, gudi ha keento ama mooshin ha lagu keene, waayo waad ogeydeeno waa la isku qabsaday oo markii Madaxweynuhu saxeexay baa la yyidhi wuu khaldan yahay, dee marka waxaanu eegaynay wax ka badal Madaxweynuhu soo jeediyo oo aynu ku raacno ama ku diidno, marka Xeerka Hab-raacisa Xeerarka la isugu gudbiyo ha la soo waafajiyo.

Md. Ibraahim Mahdi Buubaa (15min, 20sec):- Sida Xildhibaanadii iga horeeyey sheegeen ama xildhibaan Faarax Sheegay xeerkani xeerkaa wax ka bedelka iyo kaabis lagu soo sameeyey maaha. Waa xeer cusub oo muujinaya qodob qodob la mid ahi in aanu jirin, xeerkaa hore ee goluhu ansixiyey ee wax ka bedelka iyo kaabista lagu soo samaynayey. Qodob kaliya oo ku qoran halkii qodobadii xeerkaa hore ma jiro. Taas macnaheedu waxay tahay in xeerkani yahay xeer cusub oo aanu ahayn xeerkaa Goluhu ansixiyey ee wax ka bedelka iyo kaabista lagu samaynayey.

Halkan waxa lagu qoray wax ka bedelka iyo Kaabista ee Xeerka kufsiga, Sinnada iyo fal dambiyeeyada la xyidhiidha. Xeerkani waxa uu halkaa ku waayey wax ka bedelkii iyo Kaabistii la sheegayey.

Sixitaan, Guddoomiyaha:- Xeer ayeynu ansixinay kufsiga ah, Madaxweynuhu wuu saxeeyey waad ogayd oo culumadi ayaa ka daba timid, culumada ayaa loo dhiibay wax ka bedel ayey ku soo sameeyeen, ka dib Golaha ayaa la keenay. Dood ayaa la galay waxa la yyidhi ha la kala saaro oo Qodobadii la soo beddeley oo gooni ha loo saaro kii aynu ansixinay iyo kan. Xeerkaa wuu isku dhexdaatay markaa madaxweynuhu wuxuu yyidhi xeerka ha loo aqoonsado xeer cusub sidaas ayaanu ula dhaqmaynaa.

Md. Buubaa, Xeerku marka uu Golaha imanaya waxa uu ka yimaadaa Xukumada nidaam ayaanu soo maraa, waanu in laga saaraa meel kasta oo ay ku qoran tahay wax ka bedel iyo kaabis lagana dhigaa 78/2020. Markaa intaa laga yimaado xeerkan ma Wahaabiyo ayaa soo diyaarisay mise Ehelu suna wal Jamaaca. Waayo cuulamad qaar ayaa leh sidan uu xeerku yahay sax kuma aha. Markaa waayo garabka aynu raacnay. Noo sheeg cida soo diyaarisay ma wahaabiyaa mise waa Ehelu suna wal Jamaaca.

Xeerku waa 78/2020 qodobka koobaad waxa ku qoran wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Kufsiga, sniada iyo fal dambiyeedyada la xyidhiidha waana in laga saaraa. Marka aynu ka hadlay Kufsiga iyo sinadu waa laba wax oo kala duwan. Kufsi waa qof xoog wax lagaga qaaday ama Rag ha ahaado ama Dumar ha ahaado waa qof la xoogay ama ilmo yar ha noqdo ama qof waalan ha noqdo waa qof la xoogay.

Sinadu waa qof wixiisii bixiyey oo isagu raali ka ah. Sharci ahaa laba dariiq oo kala duwan ayey qaadayaan. Ciqaabta waa laga yaabaa in ay meelaha qaarkood isaga mid noqdaan oo waxa is galay ee xukumada islaamiga ah laga soo qaadayo, waa laga yaabaa inay meelaha qaar is waafaqsanaadaan, laakiin ciqaabta kale ay ku kala duwanaanaan oo labada qof ee iska raaliga ah ama labada qof ee qof wada qasbay isku dambi iyo ciqaab noqon maayaan. Tacsiiirta waxa ku qoran 3 ilaa 8 sanno, 10 ilaa 15 sanadood. Waxaan odhan lahaa dib ha loogu noqdo tacsiiirta wixii kufsi ah ee xoog qofkaas lagaga qaaday ha la badiyo ciqaabtiisa, ka kale ee sinada ah shareeca islaamiha ah, waxay ka qabto ha lagu qaado oo ha lagu daayo.

Sida diintu inoo sheegtay qofka guur hore soo maray waa dil, ka kale ee aan guur soo marin waa jeedal iyada oo la raacay afarta markhaati ee diintu sheegtay. Laakiin qofka la kufsaday uma baahna markhaatiyaal ee waxa uu u baahan in dhakhaatiirta iyo cidii ku shaqada lahayd soo cadayso in wax gaadheen oo jidh ahaa iyo maskax ahaanba la soo cadeeyo oo xubintiisa taranta la soo eego oo aan lagu xyidhin markhaatigaa.

Qodobka 2aad: erey bixinta. Waxa uu odhnayaa

“Sino” waa galmo kasta oo ay sameeyaan laba qof oo aan isqabin, si rabitaankooda ah.

“Kufsi” waxa loola jeedaa galmo kasta oo lagula kaco qof kale oo jinsi kale ah meher la’aan iyada oo la adeegsano xoog, awood sheegasho, hadidaad, hub ama afduub iyo wixii la mid ah.

Dadka isku jinsiga laftooda waxaad maxkamadaha ku arkaysaa Nin weyn oo la leeyahay inankaa yar ayuu waxaa ku sameeyey. Dadka isku jinsiga ahna way ka dhacdaa kufsigu oo kama dhacdo oo kaliya dadka kala jinsiga ah. Ha lagu Darro qodokaas marka la macnaynayo kufsigu.

“Qof nogul” waxa loola jeedaa qof kasta oo ka mid ah, waxaan ha lagu darro xarafka e) Qof carruur ah oo ilmo yar ah, Gelitaanka xubinta taranka ee qofka labka ah ay gashay qof kale oo dhedig ah. Waxa uu ka sheekeeyey “Dekar iyo Farji” kaliya. Waxa kale oo uu raaciyey Dubur. Waxa kale oo dhici karta in meel kale laga galiyo oo aan saddexaa midna aan ahayn, waana in iyadana lagu cadeeyaa. Sharcigu xishood ma leh waana in lagu cadeeyaa.

Qodobka 4aad Fal dambiyeedyada kufsigu iyo sinada. Farqada 6aad wuxuu odhanayaa: haddii ilmo yar ama qof waalan uu qof kale ka sinaysto wax ciqaab ah la marin maayo, balse waxa waajib ah cidda masuulka ka ah ilmahaas yar ama qofkaa waalan inay mariyaan edbin iyo akhlaaq toosin shareecada waafaqsan. Waxaan u malaynayaa in ilma yar oo qaangaadhini wax kufsado. Laakiin waa in waalida la qeexaa waayo waxa jirta waali dhaqanta oo reer leh, oo marka uu faldambiyeed sameeyo la odhanayo wuu waalan yahay markaa waa in la cadeeyaa waalidu nooca ay tahay. Waalidaas oo u baahan inuu soo cadeeyo qof dhakhtar ah waana lagu cadeeyaa. Markaa waalida dhaqantaa haddii ay wax kufsato wuu waalan la odhan maayee waa waalida dhaqanta.

Md. Xaamud Cismaan Cigaal (7min, 29sec):- Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Kaaliyayaasha iyo Saxaafadaba ASC, Gudoomiye waxyaabo badan oo aan doonayay inaan ka hadlayo Xildhibaanadii iga horeeyay ayaa taa-taabtay, waxa kale oo aan doonayaa inaan sheego, Xeerkani waa laba xeer oo hal xeer la iskaga dhigay, kufsigii oo aynu naqaano macnihiisu wuxuu yahay iyo Sino, sinada iyo kufsigu mid waliba shuruuc gooniya ayuu leeyahya.

Qodobka 4^{aad} Qaybta labaad ee sheegaysa Kufsigu macnihiisu wuxuu yahay waxay leedahay kusfigu waa qof la khasbay oo la xoogay isagoon raali ka ahayn, halka sinadu sharci gooniya ka leedahayoo tahay laba qof oo iyagoo caqligoodii qaba oo raali iska ah dambigan galay, marka la xukumayona laba xukun bay kala yeeshaan oo qofkii guur soo maray iyo qofka aan guursan wali sida diintu inoo sheegayso, qofka aan guur soo marin sideetan jeedal baa meel fagaare ah lagu garaacaya, qofka guur soo maray sharciya waa rajimi oo dil dhagax ah. Waxaynu ogsoonahay waynu cibaadeysanaa oo tukunaa laakiin diinta kuma dhaqano, waxaana loogu dhaqmi la'ayahay waa caalamkaan ogolayn in la arjumo, marka hadaynan fulinayn oo ku dhaqmayn dee yaynaan sharci ka dhigin ilayn dambi ina saaran weeye oo aynu fulin waynaye.

Anigu waxaan doonayaa in la kala saaro oo laba sharci laga kala dhigo, Kufsigu oo gaar ah iyo Sinada oo gaar ah, waynu ogsoonahay markaynu barigii ka doodeynay xeerka inay culimadu yidhaahdeen sinadu xalaalaynayaa, ma xalaalaynayo, laakiin waa la arrimood oo kala duwan ciqaabtooduna kala duwan tahaye waa in la kala saaro labadaas. Sida Xildhibaan Cartan sheegay Aayadan suratul Maa'ida ee qofka fasaadka ku kacaya lagu xukumayo, waa ciqaab kala gadisan, waana fasaad qof dagaalamay oo hub sita fasaadna sameeyay.

Waxaan soo jeedinayaa qofku marku wixii caadeysto in lagu qaado xukun, xukunkaas oo la yidhaahdo (deterrent) oo ah wuxuu ku cabsado oo kaga baqo dambiga, marka waa in ay jirta deterrent uu kaga baqo dambigii inuu galo, Xeerkaa aynu ansixinay ee u dambeeyay ee Xeerka la-dagaalanka Maandooriyaha jeedalka markii la keenay ee la yyidhi xadhiga lama iibsan karo waa la baqay oo aad baa loo baqay, marka waa in la helaa deterrent noocaasa oo qofku dambigii kufsigu kaga baqo, markii Ajadaha laga doodayay ee la lahaa Xeerka doorashada ha la soo horeysiiyo waxaan anigu ku taliyay in Xeerkan la keeno wayna fiican tahay haduu maanta in horyaalo ee waa inaynu sameyna wixii inaga socon karaya ee aynu fulin karayno, laba Xeerka ha laga kala dhigo.

Hadii aynaan fulin karayn sida shareecadu Islaamku dhigayso waxa jira waxyaabo kale oo lagu baqan karo, marka la doonayo sumalka idaha in laga dhameeyo waxa la sameeyaa waa la tumaa, anigu waxaan leeyahya aynu tuno caadeystaha si aan mar dambe himadiba aanay ugu dhalanin, taas waa in la samaayee.

Waxa kale oo jirta wax la yidhaahdo (peter virus) oo ah nin wayn oo caqligiisii qaba oo ilma yar oo laba jir ama saddex jir ah u hamadoonaya, kaasna waa in la tumaa. Waxa kaloo sharcigii hore ku qornaa in xabsiga la iibsano karayn, kan kuma qorna in aan xabsiga la iibsano karayn, markaa waa in lagu soo daraa, qofkii la xidho in aanu xabsigiisa iibsano karayn.

Waxaan ku talinayaa in Xeerkaas kufsiga hore inooga baxo waayo dhibaato badan baa ka jirta, dad badan oo nugul oo aan waxba iska celin karayn maskixiyaniyo iyo macnawiyaniyo, tii ugu dambeysay ee aynu ka hadli jirnay waynu ognahay, sharcigaasi dhakhso ha inooga baxo, hana la soo habeeyo, sharciga laba xeer ha laga soo kala dhigo, qofkaas caadeystaha ah iyo qofkaas (peter virus) ahna waa in la tumaa. WSC.

Md. Xuseen Axmed Caydiid (15min 45sec):- Qodobka 1^{aad} Magac Xeerka Oo dhigan sidan “Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Wax-ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Kufsiga, Sinada iyo Xadgudubyada la xidhiidha (78/2020), **Ha loo dhigo sidan** “*Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Kufsiga, Sinada iyo Xadgudubyada la xidhiidha (78/2020)*”

Qodobka 2aad Farqada 2aad ee u dhigan sida “Kufsi waxa loola jeedaa galmo kasta oo lagula kaco qof kale oo jinsiga kale ah meher la’aan, iyadoo la adeegsanayo xoog, awood sheegasho, handidaad, hub ama afduub.**Ha loo dhigo sidan** “*Kufsi waxa loola jeedaa galmo kasta oo qof ama in ka badani kula kacaan qof kale, oo la jinsi ah meher la’aan ama aan la jinsi ahayn, iyadoo la adeegsanayo xoog, awood sheegasho, handidaada, hub ama afduub*”

Farqada 4aad xagga dambe ha laga raaciyo ereyada ah: (ama waxyeello ka dhalatay fal-dambiyeedyadaasi).

Farqadda 9aad: Ereyga **Madhabka** laga dhigo **Mad-habka**.

Farqadda 15aad ee u dhigan sidan “Maxram waxa loola jeedaa qof kasta oo ka mid ah dad ay shareecadda Islaamku mamnuucday in la guursado **Ha loo dhigo sidan** “*Maxram waxa loola jeedaa qof kasta oo ka mid ah dad ay shareecadda Islaamku*

mamnuucday in la guursado inuu guursado xyidhiidh ehelnimo, xididnimo, naas-nuujiineed, iwm oo ka dhexeeya dadkaa iyo qofka guurkooda laga mamnuucay”

Farqadda 22aad ee u dhigan sidan “Maandoorin waxa loola jeedaa wax kasta oo qofka la siiyo ama lagu sixro kaasi oo lumiya xiska iyo kala garashada qofka. **Ha loo dhigan sidan** “Maandoorin waxa loola jeedaa ka luminta ama ka qaadista xiska ama maanka, iyadoo la adeegsanayo maandooriye ama sixir”

Qodobka 3aad Farqada 1aad ee u dhigan sida “In la dejiyo xeer waafaqsan shareecada Islaamka iyo Dastuurka Qaranka JSL, mabaadiida guud ee caddaalada, qiyamka iyo dhaqanka suuban ee umaddu leedahay” **Ha loo dhigan sidan** “In la ilaaliyo qiyamka iyo dhaqanka suuban ee umaddu leedahay”

Farqada 2aad ee u dhigan sida “In la hirgeliyo ciqaabta shareecadu u dhigtay sinada noocyadeeda kala duwan (sida ta ay isla ogolyihiin labada sinaysanayaa iyo ta la khasbay ee jujuubta ku timaada)” **Ha loo dhigo sidan** “In la xakameeyo faldambiyeedyada sinada noocyada kala duwan, sida (sida ta ay isla ogolyihiin labada sinaysanayaa iyo ta khasabka ama jujuubta ku timaada, iyo dembiyada la xyidhiidha”

Farqada 3aad ee u dhigan sidan “In la ilaaliyo karaamada Aadamaha dhammaantood gaar ahaan dumarka” **Ha loo u dhigan sidan** “In la ilaaliyo karaamada Aadamaha dhammaantood gaar ahaan dadka nugul”

Farqada 4aad ee u dhigan sidan “In laga hortago isla markaana loo joojiyo faafitaanka sinada “Ha la tirtiro maadaama ay farqadda 2aad sida uu soo jeediyey ka hadlayso.

Farqada 5aad oo hadda noqonaysa farqada 4aad ee u dhigan sidan “In la xaqiijiyo in dhibenayaasha kufsigu iyo fal dambiyeedyada kale ee galmo iyo weliba markhaatyaadoodu helaan caddaalad ku salaysan shareecada Islaamka” **Ha loo dhigo sidan** “In la xaqiijiyo in dhibenayaasha kufsigu iyo xadgudubyada la xyidhiidha ay helaan caddaalad ku salaysan shareecada Islaamka, isla markaana dhibenayaasha, ehelkooda, markhaatiyaashooda iyo qareenadoodu ay helaan ilaalin iyo badbaadin”

Farqada 6aad ee u dhigan sidan “In la helo xeerar sahlaya ama saamaxaya in nidaamka maareynta iyo xalinta dambiyada kufsigu iyo xadgudubyada kale ee la xyidhiidha, noqdaan mid haboon oo la isku kalayn karo waafaqsana axkaamta shareecada Islaamka iyo xuquuqda dastuuriga ah ee cidda dhibanaha ah iyo eedayshanahaba ay xaq u leeyihiin” **Ha loo dhigo sidan** “In la helo nidaam

caddaaladeed oo waafaqsan axkaamta shareecada Islaamka oo suurto-gelinaya maaraynta iyo xalinta dembiyada kufsiga, sinada iyo xadgudubyada la xiyidhiidha"

Farqada 7aad oo noqonaysa farqada 6aad Ereyada u dhigan **"dadka Waalan"** ha loo beddelo **"dadka qaba xanuunada dhimirka"** meel kasta oo xeerka ah oo ay ku qoran yihiin erayadas ha loo beddelo sidaas.

Qodobka 4aad Fal-dambiyeedyada Sinada iyo Kufsiga B) fal-dambiyeedyada sino (Sinada laba qof isla ogol yihiin) **Farqada 2aad ee u dhigan sidan** "Qof kasta oo ka sinaysta qof aanu gayin (Maxramkiisa ah) waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan iyo ciqaabta tacsiiirta ah oo xadhig u dhexeeya 10 ilaa 15 sanno, tacsiiirta waa haddii aanu ciqaabtiisu dil ahayn" waxaan sooo jeedinayaa in laga dhigo *"xadhig u dhexeeya 10 ilaa 12 sanno"*

Farqada 3aad ee Qodobkan, ciqaabta loo jideeyey qofka minhnad ka dhigta sinada ee u dhaxaysa 5 ilaa 10 sanno, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo *7 ilaa 15 sano.*

Farqada 5aad Ciqaabta faqradda loogu jideeyey qofka si ula kac ah oo cadawtinimo leh u sinaysta si uu bulshada ugu dhex faafiyo cudurka HIV/AIDS ee uu xambaarsan yahay waa ciqaabta qof qaadicul dariiq ah (aayadda 33 ee suurat Al-maa'iida), waxaana u qaybsanaysaa 4 ciqaabood iyadoo la eegayo culayska dembiya uu galay qofka qaadicul dariiq ahi 4-taa ciqaabood oo kala ah dil, daldalaad, goyn gacan iyo lug talantaali ah iyo dhulkaa laga mustaafuriyo, oo hadda noqonaysa in la xidho, markaa may cadayn faqradan ciqaabta loo dhigay qofka isagoo isku og cudurka HIV/AIDS sinaysta ee qaadsiiya dadka uu ka sinaysto. Waxaana soo jeedinayaa *in ciqaabta noqoto dil.*

Farqadda 6aad ee u dhigan sidan "Haddii ilmo yar ama qof waalan uu qof kale ka sinaysto waxa ciqaab la marin maayo balse waxaa waajib ku ah cidda masuulka ka ah ilma yar ama qofka waalan inay mariyaan edbin iyo akhlaaq toosin shareecada waafaqsan" Waxaan odhan lahaa Qofka carruurta ah ama qaba xanuunka dhimirka ee ka sinaysta qof kale, waxa maxkamaddu ku xukumaysa qofka carruurta ah xadhig edbin ah oo dhan 1 ilaa 3 sano oo uu ku qaato xarumaha carruurta sharciga khilaafa ama haddii aanay xarumahaasi jirin, qaybta carruurta ee xabsiga, halka qofka qaba xanuunka dhimirka ay maxkamaddu geyneyso xarumaha lagu xannaaneeyo dadka qaba xanuunka dhimirka muddo u dhaxaysa 2 ilaa 3 sano oo markuu dhammaysto ay maxkamaddu qiimaynayso miyirkiisa iyadoo maxkamaddu adeegsanaysa talada khabiir caafimaad, awoodna u leh inay ku sii hayso xarunta muddo 1 sano ah oo dambe oo markuu dhammaysto ay haddana qiimaynaysa miyirkiisa awoodna weli u leh in ay xarunta ku sii hayso

muddooyin dambe oo mid waliba tahay 1 sano ilaa qiimaynta ay ka sheegayso in uu si buuxda u miyirsaday.

T). fal-dambiyeed kufsi (sino khasab ah).

Farqada 1aad ee ciqaabhoodu isa soo dhex-gelayaan ilaa 3aad (overlap isku samaynaysaa) waa kala xadeeyey taas oo u kala dhigay sidan:

- *Farqadda 1aad ciqaab u dhexaysa 10 ilaa 12 sano*
- *Farqadda 2aad ciqaab u dhexaysa 12 ilaa 15 sano*
- *Farqadda 3aad ciqaab u dhexaysa 15 ilaa 20 sano*

Farqadda 4aad ee Qodobkan ha laga tirtiro ereyada ah **“oo haddii aanu u dhiman”** ciqaabta farqadda lagu waajibiyeyna ha laga dhigo ciqaabta dilka ah ee lagu jideeyey Aayadda 33 ee suratul maa’ida. Maadaama kii sinada la isla oggol yahay ku qaadsiiyey qof kale HIV/AIDS lagu xukumayo ciqaabta lagu jideeyey Aayaddaa. Ma jirto sabab ciqaab ka nasilan loogu jideeyey qofka kufsi ku qaadsiiya qof kale HIV/AIDS.

Farqadda 5aad ee u dhigan sidan “Qofka gala fal-dambiyeed kufsi isla markaana qaadsiiya HIV/AIDS, kaas oo sababa dhimashada dhibanaha ka dib xukunka fal-dambiyeedkaasi waxa uu dambiilihii xukunnaa haddii aanu xukunkii hore ahayn qisaas uu mutaysanayaa ciqaab qisaas ah haddii aanay ku badalan diyo ama aanay cafin dadkii dhaxalka lahaa” Farqadaasi waxay ka hor-imanaysaa mabda’ sharci oo caalami ah oo odhanaya “qofkii isku fal-dambiyeed laba goor looma xukumi karo” fal-dambiyeedka ay farqaddani ka hadlayso mar hore ayaa dembiilaha loogaga xukumay xabsi-daa’in, anigu se aan ku taliyey in ciqaabta xukunka marka hore ahaato dilka Allah SWT ku jideeyey Aayadda 33 ee Suurat Al-maa’ida sadaa darteed **farqadda 5aad looma baahna ee ha laga tirtiro ama ha loo cuskado Aayadda 33 ee Suurat Al-maa’ida**

Farqadda 7aad, 8aad, iyo 9aad: Haddii magdhawyada ku xusan farqadda ee gabadha dhibanaha loo jideeyey loo hayo nas shareeco islaamka ah sidaa ha loo daayo, haddii kale waxaan soo jeedinayaa in aad loo dhimo magdhawga magta dhammaystiran ee farqadda 9aad lagu jideeyey oo laga dhigayo *“Magta qofka dumar ah nuskeed (25 halaada)”*.

Farqadda 10aad “Balse waxa loo samaynayaa xabsi dhaqan celin ama edbin ah oo ku haboon si waafaqsan xeerarka dalka ee la xyidhiidh” **Ha loo beddelo sidan** “Balse waxa qofka carruurta ah ee kufsigu ku kacay kagu xukumayaa xadhig

edbin ah oo u dhexeeya 3 ilaa 5 sanno, halka qofka qaba xannuunka dhimirka maxkamaddu u diraso xarumaha lagu xannaaneeyo dadka qaba xannuunka dhimirka muddada iyo hannaanka lagu tilmaamay farqadda 6aad ee Qodobka 4aad xarafka (B) ee xeerkan.

Qodobka 4aad Kufsi Wadareed Farqadda 1aad ciqaabta tacsiiirta ah ee u dhexaysa 10 ilaa 20 sano ha laga dhigo **17 ilaa 20 sanno**. **Halka** Farqadda 2aad ciqaabta tacsiiirta ah ee ah xadhiga 20 ilaa 25 sanno. Ha laga dhigo **25 ilaa 30 sanno**.

Farqadda 4aad erayada ah: “oo aanu u dhiman” ha laga tirtiro inta ah “Waxay mutaysanayaan ciqaabta sinada ee ku xusan shareecada islaamka iyo tacsiiirta ah xabsi daa’in” ha lagu beddelo *“Waxa lagu xukumayaa ciqaabta dilka ah ee lagu jideeyey Aayada 33aad Suurtu Al-maa’ida”*

Farqadda 5aad ha la tirtiro waayo haddii beddelaadda ku xusan farqadda 4aad la qaato looma baahna maayo, marka horena waxay ka soo horjeeddaa mabda’a sharci ee caalamiga ee ah ee aan qofna fal-dambiyeed laba goor lagu xukumi Karin. **Farqadda 6aad ha lagu qaado Aayada 33aad ee suurat Al-maa’ida.**

Farqadda 8aad haddii aanay shareecaddu si cad u xusin in gabadha kufsi lagu bikro-jebiyo yeelanayso magdhaw ah mag dumar oo dhammaystira, waxaan soo jeedinayaa in magdhawгаа laga dhigo mag qof dumar ah nuskeed (25 halaad).

Qodobka 4aad Fal-dambiyeedka Khaniisnimo Farqadda 1aad ee ka hadlaysa falka khaniisnimo ee labada qof isla oggol yihiin ee farqadda jideeyey in ciqaabteedu noqoto ciqaabta sinada ee sharceecada Islaamka jideeyey, waxaan soo jeedinayaa in loogu daro *ciqaabta tacsiiir ah oo ah xadhig u dhexeeya 12 ilaa 15 sanno, haddii aanu xukunku dil ahayn.*

Farqadda 2aad ee ah fal-dambiyeed kaniisnimo kufsi ah ciqaabta tacsiiirka ah ee farqaddu jideysey xaaladaha uu xukunku noqon waayo dil ee ah xadhig u dhexeeya 10 ilaa 20 sanno, **waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 10 ilaa 20 sanno.**

Farqadda 3aad ereyga ah: “xubinta sare ee Qodobkan” ha loo beddelo farqadda 2aad ee Qodobkan. Isla farqadda 3aad ciqaabta tacsiiirka ee lagu jideeyey ee ah xadhig u dhexeeya 15 ilaa 25 sanno, waxaam soo jeedinayaa in laga dhigo 20 ilaa 25 sanno.

Waxaan soo jeedinayaa Farqadda cusub oo noqonaysa farqadda 4aad, 5aad iyo 6aad oo kala noqonaya Farqada 4aad “Laba qof am aka badan ee si wada jir ah u

gala fal-dembiyeedka kufsi wadareed khaniisnimo, waxa qof kasta oo ka mid ah lagu ciqaabayaa ciqaabta shareecada islaamku u jidaysay sinada iyo ciqaabta tacsiiirta ah oo ah xadhig u dhexeeya 25 ilaa 30 sanno, haddii aanu xukunku dil ahayn.

Farqadda 5aad oo noqonaysa”Haddii dhibanaha fal-dembiyeedka ku xusan farqadda 4aad ee Qodobkani uu yahay qof carruur ah ama qof kale oo nugul, waxa qof kasta oo ka mid ah kooxda gashay fal-dembiyeedkaa lagu xukumayaa ciqaabta ay shareecada Islaamku u jideysey sinada, iyo ciqaabta tacsiiir ah oo ah xabsi daa’in, ciqaabta tacsiiirka ahi waa haddii aanay ciqaabti dembiiluhu ahayn dil.

Farqadda cusub oo noqonaysa farqadda 6aad ha loo dhigo sidan:

6). Eedeysanaha gala fal-dembiyeed khaniisnimo, ama fal-dembiyeed kufsi wadareed khaniisnimo ee sababa in dhibanaha uu qaadsiiyo cudurrad aan daawada lahayn sida HIV/AIDS amaba sebaba in dhibanuhu uu falkaas u geeriyoodo waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta dilka ah ee lagu jideeyey Aayadda 33aad ee Suurat Al-maa’ida.

Farqaddii hore ee 4aad waxay noqonaysaa farqadda 7aad Fal-daembiyeed khaniisnimo sida kufsigaa ama kufsi wadareedka khaniisnimo, waxa magdhaw la siinayaa dhibanaha, dhibaato kasta oo jidheed, maskaxeed, sharafeed xeerku waxba kamuu jideynin halka dhibanaha ah qof dumar ah loo jideeyey meher dhiggeeda ah iyo xaaladaha qaar mag dumar oo dhammaystiran.

Wiilka noloshiisiiba la baabiiyey ee loola tegey waxaan looba abuurin muxuu magdhawgiisu noqon karaa? Halkaa dib ha loo eego.

Qodobka 4aad ee U fadayxayn ku khasbid galmo **Farqadda 1aad** ee qofka loogu hanjabiyo in la fadaxadeeyo si qofka fadaxadaynta wadaa ugu khasbo in uu galmo la yeesho iyo **Farqadda 2aad** ee qof ugu khasbayo qofka si qof kale galmo ula yeesho, waxaan qabaa in fal-dembiyeedka ku xusan farqada 2aad uu culusyahay sidaa ay tahay waxa ciqaabta loo cusleeyey fal dambiyeedka ku xusan farqada koobaad. Waxaan soo jeedinayaa in ciqaabaha tacsiiirka ah loo kala bedelo.

Qodobka 9aad Meelo badan oo qodobada xeerka ah ayaa la adeegsaday ereyga “xubinta” iyadoo loo jeedo “farqada” farqada 1aad ee qodobka 9aad waxa lagu bilaabay “qof kasta oo qof kale galiya “xubin” jidhkiisa ka mid ah, Hadaba adeegsiga ereyga “xubin” ee loola jeedo unugyada u qaybsamo qodobku ha lagu bedelo “farqad” sidii caadada ahayd.

Qodobka 15aad afduubid ujeedo galmo kufsi iyo xadhig sharci darro ah Farqada 2aad ee ka a hadlaysa marka dhibanuhu yahay qof carruur ah ama qof kale oo u nugul, ayaa loo jeediyey ciqaab ka naasilan ta loo jeediyey marka dhibanuhu yahay qof weyn, sida ku cad farqada 1aad. Waxaan soo jeedinayaa afduubka qofka carruurta ahi ka ciqaab adkaado marka dhibanuhu yahay qof weyn sida qodobada kale xeerkuba u jideynayaa farqada 1aad ciqaabta 5 ilaa 8 sanno. **Farqada 2aad** ciqaab 2 ilaa 4 sanno. Tan ha laga dhigo **3 ilaa 6 sanno hana layswaydaariyo**

Qodobka 17aad ee Duubista, Qaybinta, ama baahinta muuqaallo galmo ama xyidhiidh la leh ama sawiro qaawan Farqada 1aad (a) xaaladda ay arimaha qodobkan lagu mamnuucay ay qofka ku kooban yihiin ha loo jeediyo ciqaab tacsiiir ah oo ah xadhig u **dhaxeeya 1 ilaa 3 sanno.**

Isla farqadaas 1aad Xarafka **(b)** xaaladda qof soo saaro, qaybiyo, daawadsiiyo qof kale, u iibiyo ganacsi ahaan ama si uu u baahiyaa ha ciqaab bato xaaladda ku xusan farqada 1aad. **Waxaan soo jeedinayaa in loo jideeyo ciqaab tacsiiir ah oo ah xadhig u dhaxeeya 2 ilaa 5 sano, marka Farqada 1aad xarfaha (a) iyo (b) isku ciqaab ha laga dhigo.**

Qodobka 19aad Farqadda 3aad ee ka been sheegidda dacwadda kufsi ee farqaddani ciqaabta ka dhalanaysa ay u riixdday xeerka ciqaabta guud, waxaan soo jeedinayaa inn farqaddan lagu jideeyo oo laga dhigo **2 ilaa 5 sanno.**

Qodobka 20aad ee u dhigan warbixinta ama cabashada fal-dembiyeedyada xeerkan ku dhigan waxa loo gudbin karaa

- 1) Ciidanka Booliska
- 2) Xeer Ilaalinta
- 3) Maxkamadda

Ha laga dhigo *“Dacwad ciqaabeed waxa dhibanaha metelaya Ciidanka Baadhista Dembiyada iyo Xeer Ilaalinta. Waxaana maxkamadda u gudbinaysa xeer-ilaalinta, meelaha aanu ka jirina taliyaha Booliska”*

Qodobka 22aad ee Doorka iyo waajibaadka Ciidanka Booliska uu ku leeyahay Baadhista Dacwadaha Farqadda (J) arrimaha laga qorayo dhibanaha ama qofka kale ee cabashada ama warbixinta soo gudbiyey ee farqadda (J) ku xusan xagga dambe ha laga raaciyo *“Cidda u gaysata magaceeda, haddii uu garanayo, haddii kalena tilmaamihiisa.*

Farqadda (sh) ereyada ka mid ah inta ku dhex-jirta labada qaanso (brackets) ee ah “Haddii uu yahay qof wanaag lagu yaqaano iyo sharaf lama xyidhi karo ilaa ay wax ku cadaynayaan, waxaan edbin mudan qofka wax u sheegta si loo dhawro sharafta dadka wanaaga iyo toosnaanta lagu yaqaano”, xagga dambe farqadda oo aan soo jeedinayo in laga dhigo 1 ilaa 3 sanno.

Farqadda (k) “Xafiiska xeer-ilaalinta guud” ha lagu beddelo “Xafiiska Xeer-ilaalinta Gobolka”

Qodobka 23aad Farqadda (T) Ereyada “Cidda uu yahay dhibanuhu” ha lagu beddo “Xogta dhibanaha”

Qodobka 24aad Gudasho la’aan waajib Baadhis dacwad fal-dembi ee xeerkan ku dhigan Fal xeerkani dambi u aqoonsaday, Erayada “Anshax marin waafaqsana nidaamka anshax-marineed ee u degsan xafiiska uu ka tirsan yahay” ha laga saaro. Ereyga kale ee u dhigan: “iyo ciqaabta ku haboon sida uu dhigayo xeerka ciqaabta guud” ha lagu *beddelo* “Wuxuu mutaysanayaa ciqaab tacsiiir ah oo ah xadhig u dhexeeya 2 ilaa 5 sanno”

Md. Xassan Xuseen Shide (2min, 55sec):- Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha marka hore waan idin salamaayaa. Xeerkan siwanaagsan ayaa looga soo shaqeeyay, inana waa in diinta iyo dadnmadaba ugu hiilinaa oo wixii waajibaad ah ee Illaahay ina farayna aynu yeelnaa sidaa ayuu xeerkani inoogu yimid, iyada oo aynaan sidiisa ku wada qaadanayn ee aynu waxyaabaha yar-yar ee ka qaldan ama talooyin ah ee uu u baahan yahay waa in aynu ku kordhinaa hadii alle yidhaa.

Mudane Gudoomiye sinada iyo kufsigu waa isku mid waayo midna xoog ayaa ku jira midna waa wax raali la iskaga yahay, sidoo kale waxaa jira hadii uu ninku xaafad hore soo maray sida ay diintu dhigayso waa rajminayaa hadii aanu so marina waa la jeedalinayaa,markaa xadkii ilaahay uu u dhigay waa sidaa.

Sidaa awgeed meelaha la leeyahay iyada oo xadkii ilaahay soo dajiyay la mariyay hadana xadhiga ha loogu daro waxaan u arkaa in ay qalad tahay waayo iyada oo dadka hortooda lagu karaamo riday ayaa ugu filan in la ciqaabo.

Waxaan soo jeedinayaa:-

- In xeerkan sidaa lagu sii dayn ee aynu ku darno Gudi ka kooban Diinta iyo awqaafta 1 Golaha wakiilada ah. 1 Golaha Guurtida ah, iyo 3qof oo dadweynka ka imanaya, gudidaas oo fulisa xadka lagu oogayo qofka iyada oo la qarinayo wajiyadooda si aan loo aqoonsan haybtooda.

Md. Maxamuud Axmed Obsiye (23min, 39sec):- ASC, Bacda salaam, Xeerkan ina hor yaala sidaad ula socotaan waa xeer xasaasiya muhiima, bulshada nabad galyadooda, akhlaaqdooda iyo sharaftooda tilmaamaya sidaa darteed in la lafa guro waa ku haboon tahay, hasa yeeshee waxaan ku bilaabayaa inaan taageero xildhibaanadii soo jeediyay in xeerkani procure kii goluhu lahaa aanu soo marin, taasoo keenaysa sharaf dhac u keenaysa golaha wakiilada in waajibaadkoodii sidi sharcigu farayay u gudan.

Xeerkan horaa loo ansixiyay waa uu soo noqday amendment buu kusoo noqday, hadana amendment uma eeka, waa xeer cusub, xeerka cusubna sida xeer hoosaadku dhigayo xeerka cusubna waa in guddida lagu celiyaa. Kani waabuu kasii xag jiraa kuwo kale oo la aqbal karo waa jireen laakiin kan ahmiyadiisu waxaa weeye culimadii shalay markaanu ansixinay lala tashaday hadana waa nalagu soo caliyoo culimadii baa la yidhi way kasoo hor timid, imikana culimadii inay ka hor imanayso iyo inay ogolaanayso ma ogin.

Sidaa darteed xeerkani si aanu u noqon wax lagu ciyaaro waa inuu golaha sharciyadeeda soo maraa oo guddidi lagu caliyaa, guddiduna u samaysaa siminaarkii culimadii u yeedhaan oo laga saxeexaa inay goob joog ahaayeen oo marka dambena wixii aaraa iyo aragti ah ee la isku afgarto lasoo ban dhigaa, sidaas uunbuu xeerkani ku ansaxayaa, laakiin hadaynu maalin walba intaynu ansixino hadana dib loosoo caliyoo waa dhibaato, waana foolxumo dusha ka fuulaysa golaha wakiilada.

Golaha wakiiladuna wuxuu u joogaa wax sharciya oo wanaagsan inuu soo saaro oo muran iyo doodna waxba ka lahayn oonu dibna ugu soo noqon, haduu ugu soo noqdana amendment yar oo qodob iyo laba ah uu ku jiro baa loo baahan yahay markaa taa waan taageerayaa in lagu caliyoo maadaama ahmiyadaa uu leeyahay marhorena uu imid xeerkiina imika bilow yahay waa in guddidii lagu caliyaa , guddidiina uu u yeedhaa xildhibaanada aqoonta u leh ee fahamsan wax ka gaysan karana u yeedhaan iyo cidii kale ee danaynaysana loo yeedhaa oo culimadu kow ka yihiin

Ta labaad waxaa muhiima xeerkan qodobadiisu wixii laga doodday oo ay xildhibaanadu ka doodeen oo ay garashadoodii ku saxeen mooyee waa xeer qodobadiisa kale lasoo yara hufay, hasa yeeshee waxaa muhiima inaynu ogaano waxaa islaamku ka qabo arintaas. Faaxishada waxaan la idhaado sinada waa liwaadka waa waa sixaaqa waa wax kastoo ceebayna mujtamaca diinteenu waa ka ilaalisaa. Mana banaana in la faafiyo, sidaa darteed dambi in la galo waxaa ka horaysa in laga hor tago ciqaab intaan la gaadhsiin qofka waa in laga hor geeyaa wax la idhaa waano, wacdi iyo wixii qofku la kulmayo.

Xeerarkuna sidaan ognahay waan asixinaa laakiin mararka qaar marka maxkamada la geeyo wuxuu ku odhanayaa anuu maba garanayo oo xogogaalba uma aha carabtuna waata tidhaa al qaanuunku ninka aan daba galin maba qabanayo islaamkuna waa sidaasoo kale laakiin islaamku wuxuu aad ugu daneeyaa in mujtamacu nadiif noqdo, nadiifna wuxuu ku noqonayaa inaan laba soo hadal qaadin sinada qod qodkeeda iyo wexeedaba shareecadu way cadaysay waxay ka qabto laakiin marnaba masoo hadal qaado mana jecla in mujtamacu faaxishadaa isku dhex wareejiyo.

Rasuulkeenuna salaahu calayhi wasalam wuxuu yidhi **qofka xumaanta iyo faaxishadaa la yimaada asturaada ilaahay ha hoos galo, qofka anaga naga hor yimaada ee xaqiiqadii faafiya ama ku faana xadkaan ku qaadanyaa** xadkuna waa kitaabka ilaahay. Ta muhiimka ahna waxaa weeye arintani hadii sino hadii la idhaa iyo kufsi hadii la idhaa, sinada waxaan ku ognahay inay laba qof ka dhacdo hadana islaamku ma banayn in la sheeg sheego cida ay ka dhex dhacday laba shaybaana lagu aqoon sadaa waa qiraal iyo afar raga oo arkay ficilkii oo sidiida u dhacaya irbadii iyo duntii oo isku jirta, markaa maxaa loo adkeeyey waxaasoo dhan inay faaxishadu faaftaa la diidayaa.

Hadii nin iyo naag isku tagaan sida ay sheegayaan halkan waxaa ku qoran isu tageen iyagoo is ogol, wax is ogolaansho ah ma jiraan waa xaaraam bay isugu tageen weeye hadaanay naagtisii ahayn laakiin naagtaa kale kufsi haday tahay dambi maleh iyadu ka kufsaday baa dambigaa iska leh ficilka la imid, taasina way dhacday xiligi nabiga, masaajidkii oo laga soo baxay bay naag qaylisay waa laga hortagay waxay tidhi ninkaasaa i fara xumeeyey waa lasoo qabtay nabigaa loo keenay xadkii buu isaga ku qaaday iyadiina wuxuu ku yidhi iska tag hadaba waxaa jira mar la baneeyey inaanu qofku afar marag keenin waana ninka xaaskiisa tuhma ee idhaa faaxishadii bay samaysay suuratu nuur bay ku cadahay wax walba oo halkaasi.

Xeer baa noo yaalay xeerka anshaxa xeerkaas baa u baahan in la fuliyo, anshaxa mujtamacu waa ka ugu muhiimsan oo lagu dhawrayo laguna ilaalinayo waxyaabahaas oo dhan, kan sinada iyo kufsigu waa naadir. Imika halkan waxaa ku qoran inay bateen, dee hadaad imika masaafada eegtid ma badna laakiin xeerkani wuxuu jidaynayaa inay Somaliland noqoto jeel weyn oo lagu xareeyo qofkastaba sababtoo ah qofkastaaba wuu dacwoonayaa wuu tagayaa maragbaan lagu furayn.

Waxaas oo dhana waa faaxishadii oo la faafiyay loomana baahna qofka inuu qiraal la yimaado iyo inuu asturo oo uu asturaadaa ku nabad galiyo. 25 sanoo xadhiga 30 sano xadhiga waxaasoo dhami waxba kordhin maayaan balse way dhiiri galinaysaa sababtoo ah xadhiga wax badan baa lagu fakadaa oo uma arko inay

wax calinayso sababtoo ah ilaahay uunbaa og siduu u joojinayo faaxishadaas wuxuuna ku joojiyay karbaashkaa 100 ka ah ninka aan muxsinka ahayn ka kalena waa dil.

Hadaba kufsigu wuxuu kaga duwan yahay xukunkiisa waxaa la gaadhsiiyaa heerka ugu khatarsan oo ay ka mid tahay jid gooy, waayo qofku markuu dumarkii nabad galin waayo jidkii buu diiday inay u socdaan sidii xoriyada ahayd wuxuu la mid yahay qaadacu dariiqaas jid gooyada u samaynaya dadka ee u diidaya inay noolaadaan sidaa darteed baa loo dilaa.

Sinada iyo kufsigu xeerkeeda ilaahaybaa cadeeyey, halkan wixii lagu soo daray marka la leeyahay xadgudubyada la xyidhiidha, xadgudubyadaa la xyidhiidhaa maxay yihiin su'aasha lays waydiinayaa waataas, waxaa muhiima in la yidhaa dawaacigii iyo wixii keenayay sinada in halkaa lagu soo daro mana ku jirto halkan wixii lagu dhowrsoonaan lahaa ama lagaga hor tagi lahaa ee ka horayn lahayd cuqubadaa dambe in la gaadho, markaa kuma arko wax la xyidhiidha xadgudubyada.

Md. Cabdraxman Muuse Jaamac (3min, 41sec):- Anigu waxaan ku taagnahay culimadu waa badan tahay, xeerkana ilaahay baa cadeeyey suurad dhan baa lagaga hadlayaa wixii sino ahaa iyo wixii ku saabsanaaba, markaa wixii ilaahay kitaabkiisa ku sheegay inaynu nidhaahno ilaahay kitaabkiisu wuxuu ku sheegay hadana wax kalaynu ku daraynaa ilama haboona, waxaan leeyahay culimadii soo diyaarisay in laynoogu yeedho si faahfaahin dheerada inooga siiyaan waxay diintu ka qabto intaan xeerba loo galin kitaabka ilaahay wixii uu ka qabo in halkaa la keeno. Mida kale waxaa weeye aad iyo aad bay u culus tahay arinkan sinadu waxaan arki jiray waagii hore Somalia marka sinada la qaadayo dadkoo dhan waa laga saari jiray maxkamadaha, labadaa qof ee wuxu ka dhaxeeyaan iyo markhaatiyadooduunbaa loo ogolaan jiray, markaa hada fawaaxishadii baynu banaynaynaa in la daawado in la dhagaysto ay suuqii gasho in la faafiyo ayuu xeerkan banaynayaa. Markaa anuu waxaan leeyahay haloo daayo intii ilaahay sheegay oo kaliya. Mida labaad culimadii xeerkaa la sameeyey wax kasoo badashay waa inay imaadaan ileyn xeerkasta qolada soo samaysaa halkaasaay inoogu imaadaano suaalo lagu waydiiyaaye oo wixii lagu margado oo dhan baa la waydiiyaa oo ay jilciyaan.

Waxaan soo jeedinayaa inaanu sidan inagu dhaafin ee bal loo saaro cid kale oo inoo soo yar jilcisa guddidii shaqada ku lahaydna loo saaro aqoon yahana lala kaashado

Md. Maxamed Xuseen X. Ciise (2min, 38sec):- ASC, salaam ka bacdi, Xeerkan waxaynu ansixinay isagoo Xeer ah dabayaqadii 2017 oo guurtidaynu u gudbinay

ka dibna intuu inagu soo noqday oo dib baynu u ansixinay, madaxweynaha markaynu u gudbinay wuu saxeexay, hab-raacii shuruucda marku maray ee la saxeexay bay qaylo ka timi, Xeerkani magaciisu wuxuu ahaa Xeerka Kufsigu iyo Xadgudubyada ka dhan ka ah haweenka, Xeerkii dhaqangalay yaa badali kara oo burin kara ilayn xeer qaran buu noqday, Maxkamada dastuuriga ah cidina ma gayn si uu u buro oo ay fasirto, Xeerkaasi xagee buu qabtay Gudoomiye.

Gudoomiyaha Baashe:- Xildhibaan Maxamed Xeerkii wax ka badal buu Madaxweynuhu ku soo sameeyay oo culimo iyo sharciyqaano iyo goleheena qaar ka mid ah baa loo dhiibay oo wax ka badal ku soo sameeyay, wax ka badalkii Golaha lagu soo celiyay, Goluhu markii laga doodday waaxaan la soo kala saarin wax ka badalkii iyo Xeerkii, xeerkii isku dhan baa la inoo keenay, Xildhibaanadu doodii waxa la soo jeediyay in la soo kala saaro, markaanu celinay, degreeto ayaa lagu soo celiyay oo waxa la yiidhi Qodobada badan baa wax laga badalay marka Xeerkii isku dhan baa la inoo soo gudbiyaye adigu qodobada Xeerka ka dood.

Md. Maxamed Xuseen: - Mudane Gudoomiye Xeerkani waa Xeer cusub, marka ama Xeerkii hore ha la tirtiro oo ha la yidhaahdo waa Xeer cusub, ama ha la yidhaahdo waa wax ka badal oo ha la cadeeyo Qodobada wax laga soo badalay.

Md. Yuusuf Liibaan (21min, 01sec):- ASC, Waad-mahasan tahay Gudoomiye, Xeerkan lambarkiisu yahay 78/2020 waa xeer ay umada reer Somaliland in badan u oomanayd oo nasiibku maanta uu keenay, shuruucdu waxay u qaybsan taa general law iyo special law, Xeerkani waa special law oo ah xeer gaar ah oo saameeya sinada iyo kufsigu oo uu gaar u yahay xeerarka oo dhana ma saameeyo.

Xeerkani wuxuu ka kooban yahay laba qaybood, qayb ku saabsan ciqaabta la marinayo Kufsigu, sinada iyo xadgudubyada kale ee la xyidhiidha iyo qayb ku saabsan baadhista booliiska, waajibaadka Xeer-ilaalinta iyo cadaymaha maxkamaduhu ay ku go'aan qaataan.

Qaybta kowaad ee ciqaabta kufsigu, sinada iyo xadgudubyada la xyidhiidha anigu waxaan ayidsanahay dooddii uu soo jeediyay Xildhibaan Xuseen Caydiid iyo kuwii la mid ka ahaa oo qodob qodob xeerka u akhriyay, madaama ay qodob qodob u akhriyeen uma baahni inaan dib ugu noqdo, waxa qudha oo aan taabanayaa xaga cadaymaha oo wixii ku jiray Xeerka Ciqaabta Guud ee la xyidhiidhay dacwadaha anshax xumada iyo waxyaabaha u gaarka ah.

Xaga baadhista dacwadaha iyo booliiska, booliisku dambi kasta oo dhacda Qodobka 21aad ee Xeerka habka Ciqaabta ee reporting oo ah in qofka dhibanaha

uu booliiska u soo sheego dacwadiisa booliisku record-gareeyo daabadeedna u dhaafo Qodobka 22aad ee Xeerka habka ciqaabta oo qofka statement ka qor ama cidii kale ee la socota ee wax ka ogayd arrintaas, Qodobka 24aad in Booliisku ogaysiiyo Xeer-ilaalinta iyo Maxkamadaha awood u leh qaadista dacwadaas oo iyana waa shaqadiisa, waajibaad farabadan buu farayaa booliiska Xeerka habka ciqaabtu oo ay ka mid yihiin inuu goobtii tago baadho oo soo eego dabadeena wixii uu soo arkay qoro cidii la xiyidhiidhana soo xidho, marka baadhista Booliisku waxay socotaa Qodobka 21aad ilaa Qodobka 76aad ee Xeerka Hab-ciqaabta, marka intaas oo qodob ee aan soo sheegay wax ka hor imanaya Xeerkan ma jirto oo way iswaafaqsan yihiin.

Marka loo dhaafo Xeer-ilaalinta Xeerkani wuxuu sheegaya inta Xeerka habka ciqaabtu sheegayo oo Xeer-ilaalinta hawshoodu waxa weeye Qodobka 70aa, 71aaad, 72aad iyo 110aad, 114aad, 163aad ee Xeerka habka ciqaabta, waajibaadka Xeer-ilaalintu iska leedahay Xeerkan way kuwada jiraan oo waa lagu soo min guuriyay kama maqna Xeerkan.

Cadaymuhu waa Qodobada 138aad ilaa 87aad iyana halkanay ku hoos jiraan, cadaymahasina waxay yihiin cadayn toos ah, cadayn dadban, cadayn dukumentira, caday material evidence ah iyo cadayn ku saabsan qoraalo dukumentiyah ah, waxaas oo dhan waa cadaymaha laga rabo inay maxkamadaha hor yimaadaan oo maxkamadu ku go'aan ku qaadato. Markhaatiyaashii baa iyana ku jira oo ah Qodobada 78aad, 187aad iyo 188aad oo ah qaab markhaatiyaasha maxkamaduhu u dhageystaan iyo su'aalaha la waydiinayo, difaaca iyo su'aalaha la waydiinayo, wuxuba halkan way kuwada jiraan.

Waxaan arkaa Xeerkan inuu yahay mid lagu soo fara-jabay oo culimadu ku soo fara-jabeen oo aqoonyaha sharciyeed ka qayb-qaateen, mad-madaw lagama waayi karo waxa la yiidhi hawshu markay maqaarka diidayso meelo dal-daloolay ka aragtaa, marka shacigan mad-madaw ma waayi karo iyo xaraf turjumaadisu khaldan tahay laakiin waa in baahida guud laga raaca. Wuxuu ku sii dheeryahay waxyaabo uu diidan yahay oo Xeerka Ciqaabta Guud tilmaayo oo first evidence ugu horeeya ka mid ah oo xeer-ilaalintu ay adeegsato, tusaale dhibanaha waa markhaatiga ugu wayn ee Xeer-ilaalintu maxkamada ku soo tuurto oo tidhaahdo ha naloo dhageysto, Xeerkani wuxuu leeyahay Maxkamadu yaanay tixgalinin hadii aan la helin cadaymo kale oo kaabaya oo culus. Waxa kale oo Xeerkani dhinac iska dhigay xaashida reffertada la yidhaahdo ama medical evidence oo ahayd waxyaabaha ay maxkamaduhu kuba go'aan qaataan oo xukunadooda ku

saleeyaan, xeerkani wuxuu leeyahay hadii qaybo kale oo xoojinaya aanay jirin iyana laguma go'aan qaadan karo.

Xeerkani waxyaabaha uu kaga muda-karsan yahay Xeerarkii hore waxa ka mid ah kufsigu hadii afar qof iyo wax ka badan markhaati ka furan waa dil oo dil buuba gaadhsiiyay, sinada iyo wixii nabadgalayada ama akhlaada guud waxyeelaya waa dambi, marka Xeerkani waa Xeer shareecadii oo dhami ku dhan tahay, waana Xeer special u ah Kufsigu, Sinada iyo xadgudubyada la xidhiidha.

Markaa anigu waan ugu mahadnaqayaa Culimadii iyo cidii kale ee ku soo faro-jabtay, waana Xeer aad u muhiima oo dhamaystiran, waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan si deg-dega loo ansixiyo, waana Xeer umadu aad ugu baahan tahay, waad-mahadsan tihiin.

Cawad Cali Maxamed
Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI
